“OGOW XUQUUQAHAAGA QOXOOTINIMADA: “DIYAAR AHOW, HANA BAQIN”

*Tani waa kaliya **in la baro** bulshada xuquuqdooda. Mana **aha talo sharci**.*
Wixii su’aalo ku saabsan xaaladdaada qoxootinimida ee kuu gaarka ah, fadlan la tasho hay’adda ku keentay ama looyar socdaal ama wakiil cad.

I. Xaqa aad ku leedahay Bulshada

Dawlada fadaraalka ee Maraykan baa waxay ku siisay aqoonsi qaxootinimo oo Mareykanka gudihiisa aad ku noolaankartid ah. Aqoonsigaasina wuxuu ku siiyey xuquuq iyo masuuliyad la mid ah muwaadiniinta Mareykanka ah.

Xuquuqahaas waxaa ka mid ah:

- Waxay dowlada Maraykanka kuu ogoshahay inaad u soo guurtid wadanka oo loguguna soo dhoweeyo.
- Waxaad xaq uu leedahay inaad ku dhaqanto **diinta** aad doorato.
- Waxaad haysataa fasax inaan ka **shaqayso** Maraykanka.
- Adiga iyo kuwa aad jeceshahay (qoyskaaga) waxay xaq u leeyihiin inay ku noolaadaan **meel nabad ah.**
  - ➢Booliisku wuxuu u joogaa in adiga iyo qoyskaaga ay ilaaliyaan.
  - ➢Hadii nabadgaliyadaada la handado ama aad tahay dhibana dambi:
    - ✓ Wac 9-1-1 si dag dag ah. (Tarjumaana waad heleysaa.)
    - ✓ U sheeg maamulaha haya kayskaaga ee hay’addaada dib u dejinta.

Mas’uuliyadaha ku saaran marka aad dagantahay Maraykanka waxaa ka mid ah:

- Waa inaad **adeecdaa sharciga**. Haddii aad geysato dambi dhibaato ayuu sharcigaaga u gaysan karaa.
- Waa inaad **bixisaa canshuur**. Haddii aad hesho warqad aanad fahmin, la tasho hay’addaada dib u dejinta.

II. Xuquuqdaada Haddaad La Kulanto Saraakiisha Dowlada Dhexe ee Maraykanka

Haddii wakiil Federaal ah uu yimaado gurigaaga ama meesha aad dagantahay, waxa laguu ogolyahay inaad sameyso kuwan?

- Waxaad **xaq u leedahay inaad iska aamustid.**
- Waxaad **xaq u leedahay inaadan saxiixin waraaqaha la soo bandhigay**.
- Waxaad **xaq u leedahay inaad la tashato looyar/abukaato.**
  - ➢Hadii aadan haysan looyar/abukaato, la tasho hay’adaada dib u dejinta. Waxaa laga yaabaa inay awoodaan inay kugula taliyaan adeegsiga sharci lacag la’aan ah ama mid qiimo jaban.
  - ➢Waxaad ka heli kartaa adeegyada sharciga https://cliniclegal.org/directory ama http://www.ailalawyer.org/

- Waxaad **xaq u leedahay inaad doorato inaadan ka jawaabin su'aalaha ay ku waydiinayaan.**
- Waxaad sidoo kale qoran kartaa ama sawiran kartaa magacaydada iyo calaamadaha cadaynaya askarta/saraakiisha kuu yimid.
- Ogaysii hay'addaada dib u dejinta in laguu yimid hadaad u baahatidna raadso hagitaan.

Haddii wakiil Baarista Federaalka (FBI) uu ku weydiiyo inuu kula hadlo ama waraysi kula yeesho, maxaad samayn kartaa?

- Wakiilada ka socda Xafiiska Baarista Federaalka (FBI) ama Wasaaradda Arrimaha Gudaha (DHS) waxay ku weydiin karaan inay kula hadlaan.
- Waxaad **xaq u leedahay inaad diido waraysiga**, laakiin tan waxaa loo arki karaa shaki.
- Waxaa haboon inaad la hadasho looyar/abukaato ama wakiil sharci ah iyo/ama hay'addaada dib-u-dejinta.

Hadaad ogolaato waraysiga, tan ogow?

- Waxaad xaq u leedahay in uu kula joogo meesha looyar/abukaato. Ka fiiri kor siyaabaha loo heli karo looyar/abukaato.
- Waxaad dooran kartaa waqtiga iyo meesha wareysiga.
- Waxaad codsan kartaa inaad **horay u sii ogaato su'aalaha** lagu weydiin doono.
- Waxaad codsan kartaa inaad turjumaan meesha kula joogo.
- Uma baahnid inaad ka jawaabto dhamaan su'aalaha lagu weydiiyo, haddii walwal kaa hayo ama aadan ku xasiloonayn jawaabaha.

XUSUUSNOW: **INAADAN SHEEGIN HADAL BEEN AH** inta lagu jiro waraysigaaga. Waxaa loo tixgelin doonaa dembi ciqaab leh waxayna keeni kartaa saamayn farabadan oo xun.

Haddii aad aamminsan tahay in dhaqdhaqaaqaaga ama isgaarsiinta lala soconayo ama lagu dhagaysanayo, maxaad sameyneysaa?

- Ogsoonow in saraakiisha **sharci fulinta ee maxaliga ah, gobolka, iyo federaalka ay mararka qaarkood si sharci ah u kormeeraan dhaqdhaqaaqa dadka ama isgaarsiinta** haddii ay raacaan hababka habboon.
- Shuruucda iyo qawaaniinta khaaska ah ee ku saabsan nidaamyadani way kala duwan yihiin gobal ilaa gobol kale.
- Waa inaad la hadashaa looyar/abukaato haddii aad aamminsan tahay dhaqdhaqaaqaaga ama isgaarsiinta in lala soconayo.

Haddii aad isticmaasho internetka iyo warbaahinta bulshada, waa inaad ogaatid tan?

- **Ka taxadar meelaha aad booqato ama gashid markaar internetka ku jirtid.**

Booqashada meelaha qaarkood oo laga yaabo inay haystaan fikrado xagjirnimada ama wadahadal online ah oo lala yeesho kuwa kale ee muujinaya aragtida xag-jirka ah waxay kugu keeni kartaa dhibaato mustaqbalka.

- Kala hadal carruurtaada iyo dhalaankaaga wixii ku saabsan meelaha ku haboon booqashada iyo waxa aad ka filayso inay iska ilaaliyaan. Inta badan aad bay u kula duwan tahay sida dhallinyarada iyo dadka waaweyn ay u isticmaalaan internetka.

III. Xuquuqdaada Ku Saabsan Socdaalkaaga ama Safarkaaga Dibada/Caalamiga

Haddii aad ka fikereyso socdaal caalami ah, waa maxay inaad ka warqabtaa?

- Tixgelinta iyo xeerarka ku saabsan socdaalka si joogto ah ayuu isku baddalaa. Waxaa lagula talinayaa inaad la tashato looyar/abukaato ku saabsan xaaladdaada shakhsi ahaaneed.
- Dadka haysta Giriin Kaarka way safri karaan laakiin waxaa laga yaabaa in la joojiyo oo lana yeesho waraysi.
- Hadda waa **waqti xun in qof qoxooti ah uu safro oo wadanka ka boxo**.
- Waxaa suurtagal ah in wareysi labaad ama fatashaad lagugu sameeyo iyada oo aan la adagaysan (maamulka garsoorka).
- **Adeegyo sharciga bilaash ah oo laga helo garoomada diyaaradaha**. La xiriir garoonka airport@refugeerights.org wixii faahfaahin ah.

Haddii aad joogtid garoonka diyaaradaha oo caalami ah ama xaduud caalami ah, waa maxay xuquuqdaada?

- **Masuulayaasha garoonka diyaaradaha caalamiga ah iyo dekadaha soo galitaanka waxay awood u leeyihiin inay baaraan boorsadaada oo ay ku weydiiyaan su'aalo ku saabsan muwaadinimadaada iyo qorshahaaga safarka.**
- Haddii laguu doorto waraysi labaad adoo jooga garoonka, **waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato looyar/abukaato.** Looyaro/abukaato badan ayaa lacag la'aan ku shaqeeya sababahaan awgood.
- Haddii adiga ama qof aad taqaanid la xiro, waa inaad la xiriirtaa: airport@refugeerights.org oo arrintaan u sheegtaa hay'addaada dib-u-dejinta.
- Haddii aad safraysid, kaga tag nuqulad ama koobi tigirkaaga iyo dokumentiga socdaalka qof aad ku kalsoon tahay oo familkaaga aha ama qoyskaaga.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan xuquuqahaan, la xiriir degaankaaga ama hay'adda adeegga sharciga, ama hay'ado kale ee la isku halleyn karo ama hay'adaha sharciga ama looyar/abukato.